



NØDVARSEL



# Digniinta Degdega ah ee moobilkaaga

## Akhri fariinta digniinta ah, raac taladda.

Shilalka khatarta ah way dhici karaan digniin la'aan. Markay sameeyaan, waa muhiim in aad si degdeg ah u hesho macluumaadka ku saabsan waxa dhacaya iyo waxa aad qaban lahayd. Taasina waa sababta aanu u bilaabayno Nidaamka Digniinta Gurmada ah. Haddii xaaladu soo baxdo xaga goobtaada oo ku lug leh khatar daran oo noloshaada ah iyo bogsashada, waxaad heli kartaa digniin ka kooban macluumaad muhiim ah oo telefoonkaaga gacanta aa dku helayso.

Digniinta gurmada waxa uu ka kooban yahay qoraal gaaban oo kuu sheega adiga waxa dhacaya iyo **waxa aad qaban lahayd**. Si loo soo jeediyo dareenka, telefoonkaaku wuu gariiri doonaa oo waxa uu tumi doonaa cod dheer, oo sida cod aad u dheer. Markaad hesho digniinta gurmada ah, akhri wargelinta oo raac tallada.

## Adeeg ay bixiyaan masuuliyinta dad waynaha

Nidaamka Digniinta Gurmada ah waa adeega ay bixiyaan masuuliyiinta Noorwayjiyaanku. Booliska iyo Difaaca Madaniga ah waxya awoodaan inay diraan wargelinta.

Dhowr wadamada Yurubiyaanka ah waxay u leeyihiin waayo aragnimda wanaagsan ee teknoolajigan si ay ugu digaan muwaadiniintooda khatar halis ah sida daadka, weerarada argagixisada iyo daadashada kimikada. Digniinta gurmada ee telefoonada moobilka waxay caawin kartaa ilaalinta nolosha iyo caafimaadka halkan gudaha Noorway.

Nidaamka Digniinta Gurmada ah waxa uu taageera kanaalada hadda ka hor la isticmaalay si loogu wargeliyo dad waynaha. Gudaha Norway, hadda ka hor waxaaunu haysanay digniinta dad waynah qayb wakhti ah, oo lagu bixiyay codka dhawaqa dheer, taas oo ku ishaarto cod qaylo dheer oo waa inaad raadiso macluumaad. Dhacdada shilka khatarta ah, macluumaad muhiim ah waxaa laga baahin doonaa dhow kanaal, tusaale ahaan, raadyaha, Tiifiiga, wargeesyada onlaynka ah, boggaga shabkada masuuliyiinta dad waynaha iyo saxaafada bulshadda.

Codka waxa la tijaabiyaa lix bilood oo kasta, Nidaamka Digniinta Gurmada ee telefoonada moobilka sidoo kale waxaa loo baadhi doonaa si caadi ah.

## Sida Nidaamka Digniinta Gurmada u shaqayso

Digniinta gurmada ah waxaa lagu diraa shabakada telefoonka gacanta dhammaan ilaa telefoonada gacanta ee heli kara fariimahan, dhowr il bidhiqsi gudahood. Qoraalka wargelinta ah waxaa lagu muujin doonaa miduun Noorwayjiyaan ama Ingiriisi, iyaddoo ku xidhan setinka luqadda telefoonkaaga. Haddii telefoonkaagu taageero qoraal ilaa hadal, sidoo kale waxaad fariin u sidi kartaa si qaab sare loogu akhriyo.

Nidaamka Digniinta gurmada ah ma isticmaasho lambarka telefoonka ama macluumaad kasta oo ku saabsan adiga ama telefoonkaaga. Uma baahnid inaad isdiiwaan geliso ama soo dejiyo abka si aad u hesho digniinta gurmada, iyo adeega gebi ahaan bilaash ah. Waa inaad xusuusato xaqiijinta telefoonkaagu inuu wata macluumaadka ugu dambeeyay ee sooftiweerkii u dambeeyaya.

Wax badan ka ogow xaga [emergencyalert.no](http://emergencyalert.no)